**IIB MA GALO**

# الجريدة الرسمية
# FAAFINTA RASMIGA AH

**JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 6aad** Muqdisho, 1 Sebt. 1978 L. 9

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

FAAFINTA BIL SOO BAXA

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiis'o waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — **Lacagta** waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

SHAHRCI

SHARCI L. 33 ee 29 Luulyo 78, Sharci Cashuur ka-dhaafid Alaabta lagu isticmaalayo Dhismaha Jidka Medina Nord iyo Farsamada Sanca Bogga 558

SHARCI L. 34 ee 29 Luulyo 78, Dhismaha Sicirka Sonkorta Warshadda Johar.- » 559

SHARCI L. 35 ee 13 Agosto 78, Meel marin UMA ee ka tirtiridda Dhuuqaatayaasha Afrika - » 561

LAW N. 35 13th August 78, Instrument of Ratification of the OAU Convetion for the Elimination of Mercenarism in Africa.- » 562

### QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWAYNAHA J.D.S. L. 67 ee 15 Abriille 1978, Xeer Nidaamminta Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed. » 563

Wakaaladda Madbacadda Qaran ...

## QAYBTA LABAAD

XEER MADAXYANAHA J.D.S. L. 67 ee 15 Abriille 78, Xeer Nidaaminta Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed.

## MADAXWAYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad 2aad iyo tan 3aad ee Ka-Caanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada kala ah 1, 17, 18, iyo 19 ee soo baxeen 1.7.1976

ISAGOO ARKAY: Sharciga L. 1 ee soo baxay 7.1.1973 ee lagu dhisay Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed.

ISAGOO TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la soo saaro Xeer raacsan Sharciga kor ku xusan

ISAGOO TIXGELIYAY: Ra'yiga Wasiirka Gaadiidka Badda iyo Dekadaha

## WUXUU XEERAYAA

### Qodobka 1aad

Xeerkan waxyaabaha ku qoran haddii aan si kale loo macnayn waxaa loola jeedaa:

| | |
|---|---|
| W.D.S. | Waxay tahay Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed ee lagu aasaasay qaynuunka 1aad ee 7dii Jannaayo 1973, ee lagu dhisay Wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed |
| Dharaar | Qorax soo bax ilaa ay dhacdo |
| Habeen | Qorax dhac ilaa soo bax |
| Badeecad | Nool iyo Mood degaya ama dhoofaya |
| Xeerka shilka | Waxaa weeye Xeerarka adduunka ee ku saabsan shilka ka dhaca badda |
| Badeecad Khtar ah | Waxaa ka mid ah tan qaraxda, tan xoog loo cadaadiyey, dexalka, sunta, kuwa Ho laca soo tuura, kuwa noqda Khatar marka ay biyo ama dabayli gaaraan, kuwa iskood u qarxa. |
| Naakhuude | Waxaa weeye Naakhuudaha ama qofak markab ka madax ah kolkaas waxaa ka reeban hogaamiye. |
| Saliid | Waxa weeye nooc kasta oo Saliid ah iyo «Spirt» laga soo saaray saliidda (petrolumka). |
| Hantilaha | Waa qofka leh markabka, ama in leh, ka soo ijaartay, bedeecad sheegtaha amaba mid dammaanad u haysta |

| | |
|---|---|
| Hogaamiye | Waa qof aan ka shaqayn markabka oo leh awood shaqo xadidan. |
| Dekad | Waxaa weeye Deekadaha Muqdisho, Berbera, Kismaayo, Marka iyo mid kale oo si gaar ah loogu xusay xeerkan. |
| Maareeye Dekadeed | Waxaa weey sarkaalka madax ka ah Dekadaha ama madaxda kale ee Dekadda ee isugu wakiishaba. |
| Vessel | Waxaa ku jira macnaheeda markab ku dhaqaaqa matoor, waxaana weheliya markabka loo yaqaan «hover craft». |
| Markab | Waxaa weeye marakb kasta, weel badeecad,taag, sahlan, huuri amadoon ha ahaato mid diiq ku socoto ama la jiidaayo mase aha mid seeb ah. |
| Siidhi Hoon) | Waa hoon ama ci lagu sameeyay qiiq ama wax kale. |
| Socod ku jira | Waa markabku marka uusan u oolin baroosin, ku xidhnayn meel. |
| Dhismaha Dekedda | Waxaa weeye meesha wax laga dejiyo oo ay leedahay Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed. |
| Soo abbaarka Dekadda | Waxaa weeye marinka haboon ee Dekaddu leedahay. |

## IMAATIINNO IYO BIXITIINNO

### Qodobka 2aad

Naakhuudaha, Hantilaha ama Wakiilka markabka soo gelaya W.D.S. Dekedeheeda, wuxuu si dhaqso leh ka hor 24 saac ugu sheegayaa Maareeyaha Dekedda iyo Agaasimaha Waaxda

Badda waqtiga imaatinka iyada oo qoraal ah, wuxuuna codsan doonaa dhigaal baroosin ama ku soo xirasho Dekadeed.

### Qodobka 3aad

### Waxyaabaha loo badan yahay

(I) Ogeysiin imaatin iyo codsi soo xidhasho, waa inay weheliyaan waxyaalaha hoos ku sheegan:

(b) Magaca Markabka iyo Calankiisa

(t) Culayska GRT & NRT

(j) Inta uu badda kula jiro, dhererkiisa iyo ballaarkiisa

(x) Magaca iyo Cinwaanka Hantilaha, Naakhuudaha iyo Wakiilka markabka

(kh) Waqtiga imaatinka lagu wado iyo malaha waqtiga bixitaanka

(d) Inta laga dejinaayo ama inta la saari doono badeecad

(d) Inta laga dejinayo ama inta ea6usneeo,iiinooxciizp

(r) Badeecadda khatarta ah oo waafaqsan sida «IMCO» ay u tilmaantay xataa rakaab haddii aan la dejinayn

(s) Tiro rakaab inta fuulaysa ama ka sii degeysa

(c) Dekadda uu ka diiwaan gashan yahay.

(II) Warka laga helo Naakhuudayaasha, waxaa lagu xadili Diiwaannada imaatinka oo uu hayo Maareeyaha Dekedda, kan Waaxda Badda, si nidaamsan oo isdaba joog ah.

## Qodobka 4aad

## SOCDAALKA IYO TAKOORKA

(I) Naakhuudaha markab kasta oo ka imanaya Dekad qalaad waa inuu muujiyaa calaamadaha socdaalka, Caafimaadka iyo furdooyinka haddii sida lagu dhaqmo. Tilmaamuhu way ka muuqan markabka ilaa inta amar looga helayo dejinta madax-da ku shaqo leh.

(II) Matoor badeed uma tagi karo markab aan la fasixin, hadduusan ahayn kuwa loo ogol yahay, oo ah matoorka soc-daalka, Caafimaadka furdada ama kan hogaamiyaha.

(III) cidna uma bixi karto ama kama soo degi karto markab ka yimid Dekad qalaad, hadduusan ahayn dadka u fasaxan sida socdaalka, Caafimaadka, furdada, Waaxda Badda ama hogaa-miye, ilaa inta uu dejinaayo ama hoos uu dhigayo, calaama-daha socdaalka, takoorka iyo furdada.

## Qodobka 5aad

## Markab Meelaysan

ka hor inta aan la bilaabin hawlaha dejinta saarista ama fuulidda ka degid rakaab, waa in markabka la dhigo ama lagu xidho si hawsha lagu fulin karo, ha ahaato deked ku xirasho ama baroosin dhigasho.

## Qodobka 6aad

## Xaashida Ambabaxa

(I) Markabka kama bixi karo deked haddii uusan qabin Xaashida ambabaxa oo laga helo Waaxda Badda ka dib markay hubiso inaan markabkaas waxba loo haysan ama ha ahaato Maamulka Furdada ama Hay'ad kale ee Dawladdu leedahay.

(II) Xaashida ambabaxa dekedda lama bixin karo haddii lagu leeyahay markabka Kharash, ama aan laga lahayn ballaan lagu kalsoon yahay.

(III) Marka Khilaaf ku lug leh Kharash bixinta uu yimaado, waa in laga qaado curaar aan ka yarayn lacagta laysku hayo, ka dibna loo gooyo markabka Xaashida amababaxa Dekadda.

## Qodobka7aad

## Saaridda Calanka Qaranka

(I) Naakhuudaha Markab kasta oo dekedda dhex maaxaya waa inuu tixgeliyo adeecona xeerka dekadaha iyo xeerka Caalimiga ee u dejisan ka hor tagidda shilka badda mar hadii iyaga lagu dhaqmo.

(II) Maraakiibta soo gelaysa ama ka dhoofaysa dakedda J.D.S. waa inay saaraan calanka dalka uu ka qoran yahay iyo calanka Qaranka J.D.S. marka ay soo galaan xadka hogaaminta qasabka ah

(III) Calaamadda ku xusan Xeerka waxaa la saari doonaa dharaarta iyo inta uu markabku joogo dekeadda iyo ilaa uu ka gudbaayo hogaaminta qasabka ah.

## Qodobka 8aad

## Qadarinta Xirashada

Maraakiibta s oogelaysa dekedda J.D.S. waxaa loo soo xiri doonaa sida ay u kala hor yimaadaan, waxaase tixgelin la siin karaa:

(b) Maraakiibta qaadaysa dejinta badeecadda aan raagin iyo Xoolaha Nool

(t) Maraakiita loo tixgelinaayo nabadgelyada darteed

(j) Marar aad u yar, Maareeyaha Dekeddu waa bixin karaa amar soo xidhasho markab leh tixgelin isaga oo Xeerinaya arrin la xldhiidhta bani-aadanimo, dan Qaran ama mid dekedeed.

### Qodobka 9aad

### Ka furashada Dekedda

Maraakiibta waxaa laga furayaa dekedda isla marka ay bogaan Saarista ama dejinta, haddii aan fasax gaar ah oo qoran Naakhuuduhu ka helin Maareeyaha Dekadda.

### Qodobka 10aad

### Hogaaminta iyo taagagga waqtiga

### Soo gelidda iyo bixitaanka

Dekadda Muqdisho, Bebera iyo Kismaayo markabna looma ogola inuu soo galo, baxo, ama meesha uu ku xidhan yahay hadduusan wadan hogaamiye iyo taagag. Hogaamintu waa qasab iyaduna marka baroosinka la dhiganayo marsada.

Marka markab aysan hogaamintu iyo hawl qabadka taaggu waajib ku ahayn, waxaa laga rabaa in uu ogolaansho ku saab-san soo gelid, bixid ama meel bedelasho ka helo Maareeyaha Dekedda.

### Qodobka 11aad

### Codsashada Hogaamiye ama

### Hogaamiye saaran Markabka

Maraakiibta soo geleysa waa inay codsadaan hogaamiye iyagoo saaraya Calanka «G» sida ku cad Xeerarka Caalamiga ah ee Badda. Maraakiibta hogaamiyuhu saaran yahay waxay taagayaan Calanka «H».

### Qodobka 12aad

### Maraakiibta Baroosinka dhiganaaya

Maraakiibta marsada dhiganaaya baroosinka waa inay kala xiriiraan hogaamiyaha raadiyaha loo yaqaan «V.H.F.».

### Qodobka 13aad

### Dul-fadhiga V.H.F.

Maraakiibta marsada dhigan ha furtaan hana ka feejig-naadaan V.H.F. wadiiqadda 16 «Channel» saacad kasta. Dulfa-wuxuu ahaanayaa ugu yaraan 10 daqiiqadood saacad kasta.

## Qodobka 14aad

### V.H.F. wadiiqada «Channel» 12 ayaa Awaamiirta laga helayaa

Maraakiibta soo gelaysa dekedda Muqdisho doonaysa inay dhigtaan baroosin, waxay awaamiirta ka heli V.H.F. wadiiqada 12, halkaas oo saldhigga hogaamintu ugu sheegi meesha baroosinka la dhiganaayo.

(I) Marsada Dekedda Muqdisho waxaa ka reeban baroosin dhigasho ku tooska waqooyi oo ah 310 kuna abaaran nalka cas ee ka sarreeya gidaarka dekedda.

(III) Markada Dekedda Berbera:- Maraakiibta soo gelaysa waa inay ku sugtaa hoggaamiyaha marsada oo ah ½ ilaa hal Mayl kana fog ifka ama faynuuska khooriga oo loo yaqaan Tamaara «Tamara Light House» oo koonfur galbeed kaga toosan.

(Iv) Marsada Dekadda Marka:- Fawaaniista guriga nalka iyo masaajidka oo siman 3275 ka fogna uns Mayl gacanka kabel

## Qodobka 15aad

### Wargelinta Hogaaminta marka Dhaqdhaq jiro

Maraakiibta ka baxaysa Dekedda, meesha ay fadhiso ama ku xidhan tahay, ama bedelaneyso waa inay u sheegaan saldhigga Hogaaminta ugu yaraan laba saacadood ka hor waqtiga bilowga dhaqdhaqaaqa.

## Qodobka 16aad

### Hadhaaga Saliidda

Maraakiibta ku xidhan Dekadda ama dhigan marsada ama u dhow dekedda sinaba looguma ogola inay ku sii daayaan saliid ama wax kale oo qurminaaya ama waxyeelo kale gaadhsiinaya Baddda

## Qadabka 17aad

### Tijaabada Matoorka iyo wixii la mid ah

Haddii aan laga helin ogolaansho Maareeyaha Dekedda, markabna ma tijaabin karo matoorkiisa, mana socodsiin karo rafaashadaha isagoo ku xidhan Dekedda. Waxaa kale oo aanu markabna furfuri karin Matoorkiisa haddii aanu helin ogolaansho Maareeyaha Dekedda. Furfuridda halka ku xusan waa midda cadilaysa Matoorka

## Qodobka 18aad

## Hagaajinta Matoorka

Hagaajin qaadanaysa waqti ka badan hal saac laguma samayn karo Matoorada markabka aan oggolaansho qoraal ah laga helin Maareeyaha Dekedda. Marka aan matoorka lagu isticmaali karin waa in laba xirig hore iyo gadaal lagaga xiraa Markabka, diyaarna u ahaadaan si ay u taagagu u jiidaan haddii uu dhaco kedis lama filaan ahi.

## Qodobka 19aad

## Alxamid, Rinji ka qaadis iyo Garaacid

Alxamid, hagaajin hugan leh iyo renji dib uga qaadis laguma samayn karo Dekedda, haddii aan Maareeyaha dekedda bixin fasax, Haddii laga helo fasax lagu fusho hawlaha Maareeyaha, waa in Naakhuuduhu la yimaad dadaal iyo taxadar iyo feejignaan inaan qashin iyo wax culusi toona ku dhicin Badda.

## Qodobka 20aad

## Daadinta Qashinka

Maraakiibta joogta Dekedda looma ogola in ay ku daadiyaan Dekedda dusheeda ama badda. Qashinka, hadhaaga, iyo wixii kale oo tuuris ah ama la daadinayo.

## Qodobka 21aad

## Hawsha Qashinka

Waxa deked kasta caadi u ah inay qabato hawsha qashinka iyadoo qaadanaysa Kharash. Hawsha iyada ahna waa ku qasab Maraakiibta. Haddii aanay Dekaddu toos u qaban hawsha waxaa qaban Wakiillo ama cid lagu siiyo qandaraas oo uu si rasmi ah u ogolaado Maareeyaha Dekedda.

## Qodobka 22aad

## Xarka Xirka

Naakhuudayaasha Maraakiibta ku xidhan Dekedda, waxaa laga rabaa inay u feejignaadaan mar kasta xarkaha ugu xiran dekedda.

**Qodobka 23aad**

**Madaxa Xarka Xirashada**

Awaamiirta madaxa xarka xirayaasha oo ku lug leh sida xarkuhu u xirmayaan, waxaa la soconaya badmaaxada markabka oo kolba shaqada ku jira.

**Qodobka 24aad**

**Waxyeelada loo geysto dekedda ama qalabkeeda**

Waxaa bixinaya magdhawga dhibaatada gaarta dhinaca Dekadda, qalab badeed, qalab dekadeed ama hanti kale oo ay Dekeddu leedahay markabka geysta ama Wakiilkiisa inta uusan ka ambabixin dekedda haddii aa n laga haysan dammaanad kale oo kaafi ah.

**Qodobka 25aad**

**Shaqo Siinta Ilaaliyaasha**

Markab kasta oo deked jooga ama fadhiya waa inuu shaqo siiyaa ugu yaraan laba ilaaliye isaga oo ka qaadanaya Waaxda Badda ee Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha.

**Qodobka 26aad**

**Badmaaxda Saaran Markabka**

Maraakiibta joogta Dekedda waa inay had iyo jeer ku joogaan ciidan ku filan oo leh awood ay ku kaxeeyaan haddii sida loo baahdo ama la soo derso kedis lama filaan ah.

**Qodobka 27aad**

**Tijaabin Hoon IWM.**

Haddii aanay jirin sabab macquul ah, maraakiibta dhigan marsada ama dekedda ku xiran ma tijaain karaan hoonka iyo waxyeelah ciya, haddii aan laga helin ogolaansho Maareeyaha Dekedda.

(I) Marka la helo ogolaansho lagu tijaabiyo hoonka, waxaa ogeysiin la siin Saldhigga hogaaminta iyada oo la caddeynayo waqtiga tijaabada.

## Qodobka 28aad

### Dab ka kacay Markab dushiisa

Marka Dab ka kaco Markab jooga Dekadda Dushiisa, Naa-Khuudaha ama Madaxa markaa ku jooga waa inuu tallaa-booyinka soo socda qaado:

b) Waa in uu si deg deg ah ula dagaallamo Dabka.

t) Ha u soo wargeliyo Maareeyayha Dekedda sida ugu toosan ee uguna dhaqso badan.

j) Ha muujiyo tilmaamaha Caalamiga ah ee u gaarka ah Dabka. Tilmaamaha waxay sii joogi doonaan in mudo ah, xataa hadduu dabku damo oo laga adkaado.

x) Waa inuu hubiyaa in shaqaalaha markabkiisu uu ka qayb galo haddii gurmad kale ay u yimaadaan.

kh) Ha u noqdo diyaar in laga furo Dekedda ama lagaga bedelo meesha uu joogo si dhaqso leh.

d) 24saacadood gudahooda waa inuu qoraal ugu soo gudbiyaa Maareeyaha Dekedda Waaxda Badda warbixin ku saabsan sidii dabku u kacay iyo inta ay leegtahay dhibaatada uu geystay si kastaba ha ahaatee. Waa iuu bixiyo warbixin inta uusan codsan dhoof.

## Qdobka 29aad

### Caari IWM.

Marka markab caariyo ama xanibmo, waxaa laga rabaa Naakhuudaha inuu yeelo sidatan:

b) Waa inuu qaado tallaabooyin uu ku hor joogsanaayo (pollution) wasakhaynta Badda.

t) Waa inuu ku dadaalo in aanu sii xumaan xaalka markabku.

j) Waa inuu soo gaarsiiyaa si deg deg ah Maareeyaha Dekedda iyo Waaxda Badda warkiisa, codsadana kaalmo haddii uu u baahan yahay, isaga oo caddeynaya nooca kaalmada.

x) Waa inuu muujiyaa tilmaamaha caadiga ah ee loo baahan yahay.

kh) Waa inuu hoon ugu digaa maraakiibta soo abbaaraysa ilaa ay khatarta ka ogaadaan.

d) Waa in shaqaalaha Markabka qayb wayn ka qaataan lana shaqeeyaan ciddii u soo gurmata.

r) Waa in la soo wargeliyo Maareeyaha Dekedda iyo Waaxda Badda marka si haboon uu u sabeeyo Markabku mar labaad.

s) Warbixin waa in loo gudbiyaa Maareeyaha Dekedda iyo Waaxda Badda intaanu Markabku codsan dhoofid Warbixintu waxay ku saabsanaan dhibaatada gaartay Markabka iyo sababaha keenay caariga.

**Qodobka 30aad**

**Deqsi IWM**

(I) Haddii markab, weel badeed dooni ama qalab kale oo sabbaynaya uu ku dego, xanibmo, ku go,doomo ama dab ku qabsado isaga oo ku jira inta u xadaysan dekedda,oo ay raacsan tahay meelaha laga soo abbaaro, Naakhuudaha ama Hatilaha Markabka ayaa mas'uul ka noqon doona wixii khasaare ka soo baxa, waxaana jid ku ah inuu si deg deg ah uga bixiyo markabka isagoo qaba kharashka oo idil marka uu ku amro Maareeyaha Dekeddu.

(II) Haddii Hantilah ama Naakhuudaha uu ka bixin waayo markabka meesha, Maareeyaha Dekeddu si aan dib u dhac lahayn ayuu hawsha u gelayaa, wuxuuna amar ku bixin in laga bixiyo markabka meesha, wixii kharash ku baxana waxaa qaadi doonaa Naakhuudaha ama Hantilaha.

(III) Haddii loo baahdo Maareeyaha Dekeddu wuxuu ka codsan Naakhuudaha ama hantiilaha dammaanad ugu filan Helitaanka kharashka.

**Qodobka 31aad**

**Lama Filaan**

Haddii wax lama filaan ah oon xeerka ku jirin dhaco, Naakhuudaha ama Madaxa markaa goob joog ah ayaa u soo gaarsiin Maareeyaha si deg deg ah, wuxuuna qaadanayaa awaamiirta uu siiyo Maareeyuhu. Naakhuuduhu wuxuu soo gudbinaa warbixin ku saabsan dhibaatada ayadoo aan dib uga dhicin 24 saac markii ay arrintu dhacday ama ka hor inta aanu helin xaashida ambabaxa hadba labada hormari karta.

### Qodobka 32aad

**Saaris, Dejin, Kaydin iyo Daadgurayn Badeecadeed**

Wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed, marna kama noqonayso mas'uuliyad xayiraad ama daahida ku timaado markab ama dajin badeecadeed la xayiray, haddii aanay iyadu sabab u ahayn

### Qodobka 33aad

**Habsamaanta shaqada Maraakiibta**

(I) Markab kasta waa inuu ku dejiyo ama ku raro badeecadiisa si fudud iyo waqti macquul ah, ha joogo jaga (berh) ama yaanu ku xirnaanine. Markii baahi lagama maarmaan ahi oo ku lug leh jirto, hala galo shaqo saacadaaha caadiga ah ama kuwa aan caadiga ahayn.

(II) Markii Markabkaasi uu suuragalin waayo sida looga baahan yahay dekedda oo ah shaqo aan lahayn istaag-taag, Maareeyaha Dekeddu wuxuu amar ku siin Markabka inuu banneeyo jagada, Naakhuudaha Markabkuna waa in uu fuliyo amarka.

(III) Markabka ku ubanneeyo jagada amar la siiyay, waxaa dib loo soo xiri doonaa marka meeli u banaanaato uuna shaqayn karo.

(IV) Kharashka ku yimaada iyada oo la fulinaayo qodobkan, waxaa qaadi markabka.

### Qodobka 34aad

**Furidda, Xiridda Godadka iyo Diyaarinta Wiishashka Markabka**

Furidda, Xiridda khaananka iyo diyaarinta iyo shaqo gelinta qalabka markabka waa xilka markabka.

### Qodobka 35aad

**Ijaar Qalab Badeecadeed**

(I) Wax allaale wixii ah qalabka lagaga shaqeeyo badeecad ama qalab kaleba oo ay leedahay W.D.S. ee la ijaaranaayo waxaa lagu ijaaran shuruud ah in wixii dhibaato soo gaara ama ay keenaan ay ka mas'uul tahay cidda ijaaratay, mas'uuliyadina ka saarayn Wakaaladda Dekedaha wixii khasaare ka yimaado halkaas.

(II) W.D.S. waxay ku dadaali in qalabka la ijaaray daryeelkiisu joogo heer macquul ah.

## Qodobka 36aad

### Badeecadda soo Geleysa

Naakhuudaha, wakiilka markab kasta oo soo gelaaya dekedda,waxaa laga rabaa in ay soo harmariyaan laba nuqul oo ah xaashiyaha loo yaqaan «Manifest» xaashida badeecadda, loona keeno Maareeyaha Dekedda ugu yaraan 24 saac ka hor intuusan iman Marakbu. Labadaa Nuqul waa inay ku qornaadaan Afka Ingeriiska oo ay saxeexan yihiin. Xaashida Badeecadda waa iney si cad oo sax ah u tilmaamaysaa waxyaalaha hoos ku sheegan:

(I) Culayska, Cabbirka, Calaamadaha, Tirad IWM. oo ah halkii xirmo ama intii isleh.

(II) Magaca cidda iska leh sida ku qoran xaashida wax lagu soo dhoofiyo «Sill of lading».

(III) Dekedda ku lug leh arrintaas way diidi kartaa inay siiso Jago Markabka aan sidan xaashida badeecadda «Manifest», una soo gaadhin Dekedda, haddii aanu ahayn mid aan wax dijinayn, qaadaya ama markab ka yimi meel aan fogayn, markaana si deg deg ah waa in Maareeyaha Dekedda loogu soo gudbiyaa laba nuqul oo ah «Cargo Manifes» durba kolka la soo xidho markabka.

(IV) Haddii la sameeyo warbixin lagaga bedelaayo xaashida badeecadda markii si run ah loo sameeyay dib u cabirid ama dib u miimaamid badeecadeed, waa in la soo gaarsiiyaa dekedda.

## Qodobka 37aad

### Badeecadda Baxaysa

Naakhuudaha markab kasta qaadaya badeecad ama wakiilkiisa, waa inuu u soo gudbiyo Mareeyaha Dekedda laba nuqul oo ah xaashiyaha badeecadda «Cargo Manifest» kuna qoran Af Ingiriis oo si tifatiran u sheegaysa dhammaan badeecadda la saaray. Xaashida badeecadd a waxaa si sax ugu sheeganayaan waxyaalaha soo socda:

(I) Culays, Cabbir, tilmaamo, tiro iyo cadada alaabta gudaha ku jirta ee cudud kasta, xirmo iyo wixii is leh.

(II) Magaca cidda diraysa sida lagu carifay warqadaha wax lagu dhoofiyo

**Qodobka 38aad**

**Faaqididda xaashiyaha Rasmiga ah**

Naakhuudaha markab kasta ama Wakiilkiisa waxaa uu hor keenayaa Maareeyaha Dekedda Diiwaan kasta ama xaashiyaha Rasmiga ah oo ku lug leh badeecadda uu siday Markabku, rakaabka saaraa iyo shaqaalihiisa.

Qodobka 39aad

Kala Saaridda

Dekeddu kama aha mas'uul alaabta lagu baxo qalad sababtiisu thay tilmaamo aan dhammayn, dar aan jirin, waxyaalaha ku qornaa oo aan si fiican loo akhriyi karin, amaba aan la arki karin cidda leh.

**Qodobka 40aad**

**Badeecadda Soo Degtay lana Dhoofiyay**

(I) Badeecadda soo degtay ee ay Dekeddu qabatay waxay had iyo jeer kula wareegtaa aragga debedda oo kaliya. Sidaa darteed, W.D.S. mas'uul kama aha dhinaanshaha ka muuqda cududa gudaheed.a

(II) Badeecadda la dhoofiyo waxaa Naakhuudaha markabku siinayaa xaashiyaheeda Maareeyaha dekedda inta ka horaysa dhoofidda markabka.

**Qodobka 41aad**

**Toos ula baxa iyo Toos ula Rarka**

W.D.S. dekedeheedu waxay suuragelin toos ula bixid badeecadeed ama u rarka marka la fuliyo shuruudahan:

b) Dhamaan toos ula bixid oo la suurageliyo iyo toos u rarka oo lagu soo geliyo gudaha si habboon, waafaqsanna habka iyo dhaqanka uu u dejiyo Maareeyaha Dekeddu.

t) Badeecadda waa inaan la soo gelin ilaa markabku u diyaar noqdo rarka

**Qodobka 42aad**

**Daahista Badeecadda**

Sinaba hayadda Dekeduhu mas'uul ugama aha daahis badeecadeed la dhoofinaayo, mid la soo dejinaayo mid lala baxayo oo ay keentay ciriiri xagga meesha dhigaalka, maraakiibta oo ay keentay ama sabab kale oo aysan hay'addu ku lug lahayn ama waxba ka qaban karin.

**Qodobka 43aad**
**Magdhaw Bakhaar**

Hay'addu waxba u magdhabi mayso badeecadda khasaaro gaahdo sabab kasta ha ku gaadho kana mid yihiin hawada oo xumaata, arrin ku lug leh sida roob, iyada oo horay loogu digay oo la gaarsiiyay Hantilaha qofka qabanaayay «Consignee» soo diraha ama wakiilka markabka inaan loo heli karin Bakhaar lagu xareeyo badeecaddaas.

**Qodobka 44aad**
**Badeecad Qaali ah**

Wakaaladda Dekdaha Soomaaliyeed, qasab kuma aha inay qabato kana shaqayso badeecadda qiimaha badan. Hase yeeshee haddii badeecadda laga shaqeeyo, Hantilaha, Naakhuudaha ama Wakiilka markabka waa inuu dhiibaa nin ka mid ah shaqaalaha W.D.S. oo si cad loogu xilsaaray, ayada oo isla markaas qiimaha xirmadii wax ku jira. Haddii ay la noqoto markaas in uu qabto badeecadda, isaguna waa inuu ka taxadiraa meesha la dhigaayo iyo sidii loogu wareejin lahaa cidda leh. Badeecadda qiimaha badan wax kasta ha ahaadeen waxa laga qaadi doonaa kharash u khaas ah ama mid ku xiran qiimaheeda «Advalorm» kharshka laga hadlayaa waa ka bakhaardhigga iyo dejinta saaridda.

**Qodobka 45aad**
**Barxadda Dekdda**

marka ay badhaarradda dekeddu ku fillaan waayaan amma sadad u tahay nooca badeecaddu, waxa la dhigi badeecadda goobaha bannaan ee dekadda. Sababtaas darteed badeecadda ay dekeddu ku dhigtay meelaha bannaan, hayaddu ma magdhabi doonto wixii dhibaato soo gaara dabeecadda si kasta ha ku timaadee.

**Qodobka 46aad**
**Badeecadda Mas'uuliyadeeda**

Dekeddu ma bixin doonto tacwiid haday lunto ama dhibaato ku timaado alaabta shakhsiga ah ee rakaabka haddii aan qofku haysan helis loo qoray xataa marka uu qofku halis haysato, dekeddu waxay bixin doontaa lacag qadarkeedu yahay ugu badnaan 300/ Sh.So. cuddadiiba dhibaatada ha ku timaado si kasta

**Qodobka 47aad**

(I) W.D.S. iyo dekedeheeda kama aha mas'uul haddii laga helo dhinaasho wax ku jira cududda gudaheeda. Sidaas oo kale xajmi ama culayska oo wax iskabedelaan, qiimaha iyo xaaladda badeecadda ay ku sugan tahay, kama noqon doonto wakaaladda iyo dekadaheeda mas'uul.

(II) D.D.S. iyo dekedeheeda kama noqonayaan mas'uul xumaanta gaarta badeecada nafteeda, waayitaan, dhibaato gaarta badeecadda ama khasaare kale oo gaadha mar haddii khasaaraha, isdhinka iyo xumaanta ku timi sababo aanay Wakaaladdu wax ka qaban karin. Ulajeedada qodobkan waxyaalaha ku xusan waxa ka mid ah haddii dhibaatadu ku timaado idin Eebe iyo badeecadda oo sideeda wax isu yeesha ama waxyeelo ka timaada dhinaca kaydinta.

(III) W.D.S. ama dakadaheeda waa diidi karaan inay dejiyaan ama raraan badeecad jilicsan ama badeecad si xun loo soo xidhxidhay, haddii aan la ballan qaadin wixii ka luma ama ka jaba iyo khasaaraha gaadha.

**Qodobka 48aad**
**La Wareegga**

W.D.S. waxy ogolaanaysaa in lala baxo badeecadda marka lala yimaado xaashida loo yaqaan «Delivery Order» xaashida la bixidda. Wakaaladdu marna ka noqon mayso mas'uul wixii qalad loola baxo marka loo raaco xaashida la bixidda «Delivery Order» ee khseysa dhinaca: (I) Lahaansho, (II) Calaamad (III) khalad ku qoran xaashida la bixidda badeecadda.

**Qodobka 49aad**
**Amarka sii Deynta**

b) Badeecad waxaa lagu sii dayn karaa marka la helo xaashida la bixidda oo laga soo qaatay wakiilka markabka ama laga soo saxiixay Furdada.

t) Badeecadda laguma sii dayn karo Calaamad waqtiga dekedda laga bixinaayo. Sidaas daraadeed, Hay'addu kama aha mas'uul inay kala saarto oo ay tiriso, haddii aan hantilaha ama wakiilka markabka kharshka qaadin.

Qodobka 50aad
Badeecadda dhibaato soc gaartay

(I) Jawaaniga ama cuddada ay wax gaareen waxa dib u hagaajin doona dekedda iyadoo uu kharashka qaadi doono qofka alaabta leh ama qabanaya haddii uu sidaas codsado iyo hadduusan codsanba xataa.

(II) Sida caadiga ah W.D.S. waxay eegeysaa badeecadda wax gaareen iyo ta si xun loo soo cabeeyay. Hase yeeshee W.D.S.kama noqonayso mas'uul badeecadda wax gaareen ee aan si sahlan looga garan karin marka la dejinaayo. Sida kor ku xusan, badeecadda si xun loo soo xirxiray ama kuu dhibaataysan markabka dushiisa, waxa markabka dushiisa ku indha indhayn dooan Naakhuudaha ama wakiilka markabka. Xataa marka alaabta lagu hubiyo barkabka dushiisa, W.D.S. waa diidi kartaa inay dejiso badeecadda xun ee dhibaataysan iyo ta ku jirta weel xun oo aan xejin karin.

(III) Cidda ay badeecaddu ku qoran tahay ama Markabka wakiilkiisa ayaa kaga bixin doona dekedda badeecadda wax gaareen iyo ta xumaatay muddo kuu siman 15maalmood oo ka tirsan maalintii imaatinka. Haddii badeecadda lagu bixin waayo mudada kor ku xusan, dekedda ayaa ugu talin doonta badeecadda sida la haboonaata ayada oo kharashkaa la saarayo cidda ay badeecadu ku qoran tahay. Dacwaddii ku saabsan badeecad ay dekeddu daadisay ama ay si kale u khaarijisay lama tix gelin karo, cidda badeecaddu ku qoran tahayna wax looma celinaayo, mar haddii ay kula bixi waydo mudada kore.

(IV) Cidda badeecadda xumaatay iska leh waxaa ay bixinaysaa kharashka ku lug leh badeecadda, ama ha kala baxdo dekedda ama yaanu la bixin e.

### Qodobka 51aad

### Badeecadda xumaatay

Marka dekeddu ay aqoonsato badeecad la hayo inay waxyeelo u geysan karto bedeecadda kale, waxay amar ku siinaysaa Hantilaha inuu kula baxo 48 saacaood gudahooda oo ka bilaabma mark uu helo ogeysiinta. Haddii aan amarka la fulin, W.DS. ayaa ugu bixin doonta badeecaddaas dekedda sida ay ugu noqoto sooragal, ama ugu bedeli doonto Bakhaar ama barxadda dekedda.

Hantilaha badeecadda la khaarijiyay iyadoo la fulinaayo qodobkan wax magdhaw ah ma yeelan karo, waxaaan lagu yeelanayaa kharashka ku baxa daadinteeda ama wareejinta.

### Qodobka 52aad

### Badeecadda *la* Xaraashayo

W.D.S. waa gadi kartaa badeecada ku raagtay oo taalay dekedda mudo dhan 45 cisho ama in ka badan, iyada oo habka

wax lagu gadayo uu yahay tartan dad badan oo loo yaqaan «Auctien» ama qandaraas amaba sidii kale oo noqon karta suuragal. kharashka qaan dekedeedka waxa laga jarayaa inta lagu gado,, inta soo hartana marka kharashka laga roobo, waxa lagu wareejinayaa Furdada ama wakiilka markabka, haddii aanay ahayn danta gaar ee Dekedda leedahay.

### Qodobka 53aad

### Badeecad kala Wareejin

Maareeyaha dekedda marka ya timaado baahi dekedeed wuxuu amar ku bixin karaa in badeecad lagu wareejiyo Bakhaar ama meel ka gedisan meeshee ay here u tiilay. Marka badeecad la wareejiyo, kharashka ku baxa dekedda wàxa siinaaya qofkà badeecad isk leh.

### Qodobka 54aad

### Badeecad kala wareejin

W.D.S. ama mid ka mid ah dekedaheeda magdhaw ka bixin mayso waxyeelaha ku gaadha badeecad ama hanti kale oo ay u hayso kayd, haddii khasaaruhu ku yimid sababaha soo socda:

(I) Dhibaato ay keentay badeecad oo si xun loo xidhxidhay ama aan si wacan loo dhawrin.

(II) Dhinnaan ama nuqsaan lagu arkay cuddad aan jabnayn

(III) Waxyeelo ama waayitaan oy sabab u yihiin gafafka hantilaha ama sida badeecadda.

(IV) Waayitaan ama waxyeelo ay sabab u tahay siideen (Leakage) ama siyaale kale oo la xiriira badeecadda.

(V) Waayitaan, dhibaato ama badeecad baaba'da oy ugu wacan tahay dab, biyo ama wax kale oo si toos ah ama dadban wax u yeela oo la qaadaayo tallaabo gurmad ah ee lagu badbaadinaayo badeecadda.

### Nabad-gelyada Dekedda

### Qodobka 55aad

### Cabitaanka Sigaarka

(I) Qafna kuma cabi karo sigaar ama dab kuma shidi karo gudaha Bakhaarka, meelaha badeecada la dhigo, barxadda hoosadda, Saldhigga Shidaalka ee dekedda, dheegga ama khanka markabka marka ay socdaan hawlaha dejinta saarista.

(II) Qodobkan waa la tix gelin xataa haddii aysan muujinba Dekeddu Calaamadda joojinaysa cabitaanka Sigaarka.

**Qodobka 56aad**

**Kalluumaysiga**

Haddii aan laga helin ogolaansho Maareeyaha dekedda, waa reeban tahay in laga Kalluumaysto biyaha ka tirsan seeraha dekedda, buuntada iyo meelaha kale ee la mid ah.

**Qodobka 57**

**Dabaasha *ama* Raaxaysiga**

Waa reeban tahay in lagu dabaasho ama lagu raaxaysto inta dekedda u xadidan, hadii aan laga helin ogolaansho Maareeyaha dekedda.

**Qodobka 58*aad***

**Hantida Dekedda**

Dadka loo fasaxay inay dekedda soo galaan, waa ineysan sinnaba shanta ula gelin qalabka dekedda, weelka, dhismaha, badeecadda, Maraakiibta dekedda joogta ama hantida kale oy leedahay W.D.S. iyagoo aan ka helin ogolaansho Maareeyaha Dekedda.

**Qodobka 59aad**

**Xoolaha Nool**

Xoolha Nool oo ay ku jiraan eeyaha ama kuwa kale oo loogu tala galay in la dhoofiyo lama soo gelin karo dekedda, haddii ayan ogolaansho gaar ahaaneed laga helin Maareeyaha Dekedda.

**Qodobka 60*aad***

(I) Soo gelidda Dekeddu waa reeban tahay, waxaana loo ogolyahay cidda haysata rukhsad uu bixiyay Maareeyaha Dekedda.

(II) Qof kasta oo ka tirsan shaqaalaha Wakaaladda Dakadaha Soomaaliyeed oo uu ku ilaaliye ama Boliis wuu su'aali karaa dekedda qof ku jira qofkaasna waa inuu sheegaa hawdoono inuu ka baxo dekedda, waa inuu sidaas yeelaa arrintu si kasta ha ahaatee.

(III) Baabuurta lama dhex gelin karo ama laguma dhex kaxayn karo dekedda gudaheeda, haddii aanu waduhu haysan rukhsad uu bixiyay Maareeyaha Dekedda. Xataa haddii uu rukhsad hayso, shaqaalaha iyo ilaaliyaasha dekedda ama Boliiska waa joojin karaan waana baari karaan baabuurka, waxa uu sido iyo ciddda ka mas'uul ah.

(IV) Dadka iyo baabuurta waxay dekedda ka soo galyaan ama ka baxayaan iridyada ay dekkeddu ugu tala gashay oo kali ah.

(V) W.D.S. ama Maareeyaha dekeddu, isaga oon sheegin sabab waa u diidi karaa qof ama baabuur soo' gelidda dekedda xataa haddii qofka ama baabuurka uu haysto rukhsad. waxa kale oo ay W.D.S. ama Maareeyaha Dekeddu, isagoo aan sheegin sabab dib ula noqon karaa ama tirtiri ogolaansho uu bixiyay oo la siiyay qof ama baabuur.

(VI) W.D.S. markay ay la haboonaato aan cid wargelin way xidhi kartaa deked, bakhaar ama meelaha kale oo ah dhisqaalaha Dekedda.

(VII) W.D.S. ma qaadayso mas'uuliyadda badeecad waxyeelo gaartay, la waayay ama qof dhaawacmay xataa haddii hantida ama qofku uu haysto rukhsad. Taa waxaa khilaa/san marka si aan shaki ku jirin loo hubiyo in dhibaa tada ay ka dhalatay feejignaan iyo taxadar darada sha. qaalaha dekedda.

### Qodobka 61aad

**Xilka Dekedda ka saaran Hawlaha Saaridda Dejinta iyo khananka.**

Hawlaha khananka, Saaridda Dejinta waxa u leh, kan mas'uul ah W.D.S. cidda ay u wakiilato ama ku siiso qandaraas oo kali ah. Intaa waxaa dheer in qalabka lagaga shaqeeyo badeecadda ee aan ahayn kuwa ay leedahay W.D.S. aan lagaga shaqayn karin dekedda dhexdeeda, haddii aan oggolaansho qoraal ah laga helin Maareeyaha Dekedda.

### Qodobka 62aad

**Xilka markabka ka saaran diyaarinta Wiishashka**

**Furidda godadka**

Furidda xiridda khananka iyo diyaarinta wishashka markabka waxaa ka mas'uul ah markabka. Marka kaalmo loo baahdo, dekedda waxay fidindoontaa kaalmada looga baahday oo qiyaasan (Assistence at cost), ka dib markii uu si qoraal ah ku soo codsado Naakhuudaha ama wakiilka markabka.

Marka qof ama dad badan ay W.D.S. sidaa kor ku qoran ku sheegaan darteed ugu dirto, waxaa dadka si kasta ha ahaadeen loo qaadanayaa shaqaalaha markabka. Dekeddu kama noqon doonto mas'uul waxa ay dadkaa gaystaan inta ay joogaan markabka dushiisa.

**Qodobka 63aad**

Amar wiish xumaaday

**Waqtiga la sugaayo Furdada khananka, diyaarinta wiishashka**
**Waqtiga ku luma sugitaanka khnanka la furayo, diyaarinta**
wiishashka markabka ama wiish markab oo xumaaday ama waxyeelo kale oo dhaliya dib u dhac hawlaha saarista dijinta oo uu sabab u yahay markabka, waxa lagu xisaabin doonaa markabka.

**Qodobka 64aad**

**Badeecad soo qiimaynta (Recivery**

Alaab kasta, badeecad ama qalab oo ku dhaca badda ama buuntada, waxaa soo bixinta ay dusha ka saaran tahay Dekedda. Marka dekeddu ay soo caymin karin, waxay u qabanaysaa cid soo caymisa. Kharashka la xiriira wixii waxyeelooba iyo soo caymintа waxaa dhiibi doonta Wakaalada Dekedah...

**Qodobka 65aad**

**Ka shaqaynta badeecada qaraxda, Shidaalka iyo ta khatarta ah**

Maraakiibta dejinta ama qaadaysa badeecadda khatarta ah, tan qaraxda, shidaalka ama waxyaalaha ka soo baxa shidaaalka, waxay maalintii markabka xagiisa hore saarayaan calan cas, waxay ilaalinayaan in aan sigaar lagu cabin, waana in ay dusha ku hayaan qalab iyo dad ku filan dab damis, una diyaar ah haddii dab kaco. Marka ay tahay habeen, marakabka wuxuu dhan kasta ku muujinayaa nal cas oo laga arki karo ugu yaraan laba (2) Mayl badeed.

**Qodobka 66aad**

Ma leh alxamid, garaac ama xoqid ama ifaf muruxsan
**Maraakiibta qaadaysa ama dejineysa bedeecadda khatarta** ah, shidaalka ama tan qaraxda, sinaba laguma qaban karo dusheeda wax alxan ah, xoqid renji ama isticmaalka ifaf muruxsan.

**Qodobka 67aad**

**Kormeerka Kooxda Dab Damiska Dekedda**

Madaxa ka tirsan Kooxka dab damiska dekedda wuxuu Kormeer ku tegi karaa markabka isla markaana eegi karaa qalabka la dagaalanka dabka ee markab kasta oo dejinaaya qaadaaya badeecadda khatar ah, shidaalka iyo tan qaraxda. Maareeyaha dekeddu wuxuu karaa inuu diidi ama joojiyo hawlaha dejinta saarista isaga oo ka helay talo Madaxa kooxda dab da-

(I) iyad oo aan waxba loo xeerinayn arrimo ku xusan meela kale ee xeerkan, maraakiibta aan sidan qalab ku filan la dagaalanka dabka, waxaa loo diidi karaa in la soo xiro ilaa uu Maareeyaha dekeddu ku qanco in qalabka iyo awoodda dab damiska uu ku filan yahay markabka dushiisa. Waxaa uu Maareeyaha dekeddu bixinayaa ogolaansho dib in loo bilaabo hawsha Saarista dejinta kadib marka uu ka helo talo Madaxa Kooxda dab damiska dekedda.

(II) W.D.S. iyada oon waxba xeerin waa diidi kartaa dejinta saarista badeecadda ay la noqoti inay khatar gelinayso dekedda, badeecadada kale ama dadka.

(III) W.D.S. waxay amar ku bixin kartaa bixinta, baabi,inta badeecadda khatarta ah, xataa haddii la soo heli waayo hantilaha ama qofkii lahaa awoodda qabashadeeda. Hantilaha ama qofka qaban lahaa badeecadda xaq uma laha inuu u dacwoodo magdhaw uu ka helo W.D.S.

### Qodobka 68aad

### Shaqaalaha ku dhaawacma markabka dushiisa

Marka qof shaqaale ah uu ku dhaawacmo markab dushiisa waxaa markabka waajib ku ah in uu u fidiyo qofka dhaawacmay gargaarka ugu horreeya ee caafimaad iyada oon loo eegin sababaha keenay.

### Qodibka 69aad

### Saacadaha Shaqada

Saacadaha caadiga aha ee lagaga dhaqmo dekedda Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya waa:

Maalmaha toddobaadka (Jimcuhu ka baxsan yahay) 60.00 ilaa 14.00 galabnimo.

### Qodobka 70aad

### Khidmadda waqtiga shaqada dheeraadka ah

Khidmadda waqtiga shaqada dheeraadka ah ee ka baxsan saacadaha caadiga ah iyo maalmaha fasaxa ah, waxaa lagu caddeeyay xeerka taariifada u degsan hawlaha wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed.

## Qodobka 71aad

### Maalmaha Fasaxa ah

Maalmaha Fasaxa ah waa:

1da iyo 2da Shawaal — Ciidda Fatriga ah
9ka iyo 10ka Dul Xija — Ciidda Xajka
12ka Rabiic Awal — Dhalashada Nabiga
1da Maajo — Maalinta Shaqaalaha
26ka Juun — Xornimada Waqooyiga Soomaaliya
1da Juulaay — Isutagga iyo Xornimada Koonfur Soomaaliya
21ka iyo 22ka Oktoobar — Dhalashada Kacaanka.

## Qodobka 72aad

### Awoodda Maareeyaha Dekedda

Maareeyaha Dekeddu wuxuu awood u leeyahay:-

(I) U bixidda maraakiibta soo geleysa ama ku xidhan dekedda, kuwa baroosinka u dhegan yahay marsada gudaha ama ta dibadda.

(II) Amar bixinta marsa dhigashada, ku xirashada ama ka furashada mraakiibta.

(III) Amarka kala wareejinta markab jago ilaa jago ee xuduuda dekedda oo ay ku jirto marsada gudaha iyo ta debidda.

(IV) Hubinta in maraakiibta iyo shaqaalaha saaran ay dhawrayaan qawaaniinta nabedgelyada.

(V) In uu amro bilaabidda iyo joojinta hawlaha saarista dejinta.

(VI) In uu hormood u noqdo hawsha la dagaalanka dabka, marka uu dab ka kaco dekedda gudaheeda.

(VII) Wuxuu amri karaa in aqoonyahanno ay u baxaan maraakiibta ku xidhan dekedda ama baroosinka u yaal inta ku siman seeraha dekedda.

VIII) Ka qayb galka hawl kasta oo la xiriira nabadgelyada, tacab dhalinta iyo dhaqdhaqaaqyada maraakiibta iyo badeecadda ee dekedda gudaheeda.

## Qodobka 73aad

### Baabuur

Wadayaahsa Baabuurta marka ay ku dhex jiraan dekedda waxaa laga rabaa:

(b) Si quman inay u wadaan, eegaanna haddii ay jiraan orod xadidan iyo xeerar kale oo dekedda dejisay waqti ilaa waqti.

t) Fuliyaan amarka uu bixiyo maareeyaha dekedda ilaaliyaasha ama Boliiska ku shaqo leh nidaaminta socodka dekedda gudaheeda.

(j) Ka dhawridda ku wadida baabuurta qarka dekedda, bakhaarka dhexdiisa ama meelaha kale oon loo ogolayn, Baabuurta. Wadaha wuxuu baabuukiisa ku wadi karaa meelaha aan baabuurta loo ogolayn, marka uu ogolaansho gaar ahaaneed ka helo Maareeyaha dekedda.

x) In uu san dhigin baabuurka salaamada wadiiqooyinka iyo wadooyinka la maro.

kh) In uu la joogo baabuurkiisa inta uu dekedda dhex yaalo

(d) In uu markasta ka taxadaro inaysan iskuu dhicin qalabka socda ee dekedda iyo baabuur kale.

**Qodobka 74aad**

**Xadidaada Magdhawga**

Wixii ka baxsan ama ka gedisan sida Xeerkan ku sheegan magdhawga la xiriira badeecad waxyaalo gaaraan, mid dhammaan baaba'da mid guud ahaan u lunta, qof dhaawacma ama dhinta sinaba ugama badnaan karo inta hoos ku xadidan:

| | | |
|---|---|---|
| (b) | Masiibo dhacday hal mar | Sh.So. 500.000/ |
| (t) | Dhimasho halkii qof | « 20.000/ |
| (j) | Badeecad ama alaab ay ku jiraan kuwa qaaliga ah, hashii cuddo | « 10.000/ |

**Qodobka 75aad**

**GANAAX**

Qofkasta oo ku xad gudba ama jabiya Xeerka guud ee Daakhiliga ah, xeer-hoosaad ama awaamiir oo ay soo saartay W.D.S. waxaa uu mutaysanayaa ganaax, u dhaxeeya Sh. So. 5.000/ oo ku xidhan halista ama dhibaatada uu qofku geestay.

(I) Ganaaxa kor ku sheegan waxaa awood u leh Maareeyaha dekedda.

(II) Ganaaxa ku sheegan Qodobka 3aad ee Xeerka Daakhiliga ah lama dhaafi karo mana hoos imanaayo qodobkan.

**Qodobka 76aad**

**Xeer Hoosaad (Bye-Laws)**

Marka ay haboonaato, W.D.S. waxaa lagu awood siiyay in ay soo saarto awaamiir iyo xeerar Daakhili ah oo la mid noqon kara Xeer-hoosaad ama Xeer.

**Qodobka 77aad**

**BURIN**

Sharci ama xeer kasta oo lid ku ah Xeerkan waa la buriyay

**Qodobka 78aad**

**Dhaqan Gelin**

Xeerkan waxaa qadarin doona qof kasta, wuxuuna dhaqan galayaa ka dib marka uu saxiixo Madaxwaynaha J.D.S.

Muqdisho 15 Abriile 1978.

**MADAXWAYNAHA J.D.S.**

J/lle Maxamed Syaadi Barre

Wasiirka Gaadiidka Badda iyo Dekedaha

S/Guuto J/lle Maxamuud Geelle Yuusuf